

OGAYSIISKA ECONOMIC DISPLACEMENT RELOCATION ASSISTANCE: Waxaad U qalmi Kartaa Caawimaad Dhaqaale

Barnaamijka Economic Displacement Relocation Assistance (EDRA, Caawimaada Barakaca Dhanka Dhaqaalaha) ayaa siinaaya kireysteyaasha u qalma dakhli ahaan ee lagu kordhiyay qiimaha kirada ah oo dhan 10% ama ka badan fursad ay ku codsadaan lacag ka caawinaysa inay guuraan. **Fadlan keliya codso haddii aad doonayso inaad gurto.**

Waa maxay faa'iidadu yaase bixinaaya?

Magaalada Seattle ayaa ka doonaysa mulkiileyaasha guryaha inay u sheegaan kireysteyaasha barnaamijkaan marka mulkiiluhu kordhiyo qarashka guud ee kaaga baxayaa kirada ugu yaraan 10%. Seattle Department of Construction and Inspections (SDCI, Waaxda Dhismaha iyo Kormeerka ee Seattle) ayaa lacagta kasoo qaadaysa mulkiileyaasha guryaha kadibna u qaybinaysa qoysaska u qalma. Haddii loo ogolaado, kireysteyaasha ayaa heli doona **lacag halmar ah oo ay bixinayso Magaallada Seattle oo dhan 3 jibaar qiimaha kirada bishii ee guriga.**

Sidee ayaan ku Ogaanayaa inaan U qalmo?

Si aad u hesho gunnadaan, waxaa qasab ah inaad:

1. Hesho ogaysiiska marka la gaaro ama kadib 7/1/2022 **kaasoo kordhinaaya qarashka guud ee kaaga baxayaa kirada ugu yaraan 10%**. Ogaysiiska ayaa noqon kara kan hal kordhin ama kordhino badan oo la samaynaayo 12 bilood gudahood.
2. Hesho **dakhliga guud ee guriga oo dhan ama ka hooseeya 80% Area Median Income (AMI, Celceliska Dakhliga ee U degsan Deegaanka)**.

Tirada dadka qoyska	1	2	3	4	5	6	7	8
80% AMI (2022)	\$66,750	\$76,250	\$85,800	\$95,300	\$102,950	\$110,550	\$118,200	\$125,800

3. Waa qasab inaad doonayso inaad gurto aadna diyaar u tahay u sheegista taariikhda aad guurayso mulkiilaha gurigaaga.

Waa maxay nidaamka codsiga iyo jadwalku?

1. **Kireysteyaashu waa inay diyaar u yihiin inay guuraan ayagoo qab qoraal ah ku ogaysiinaaya mulkiilahooda.** Si guud, taariikhda guuristu waa inay noqotaa dhammaadka heshiiska kirada ama dhamaadka muddada kirada bilaha ah haddii kiraystuhu yahay mid bil kasta baxsha kirada. **Codsashadu kuuma damaanad qaadayso u qalmida lacagta.**
2. Kiraysteyaasha ayaa codsan kara waqti kasta kadib marka loosoo diro ogaysiiska kordhinta qiimaha kirada (ilaa 60 maalmood kadib marka kordhintu dhaqan gasho). Haddii aadan codsan karin muddadaan gudaheed, fadlan **wac 206-684-5700 si aad ugala hadasho** dookhyada *kahor* intaan muddada codsigu dhamaan.
3. SDCI ayaa akhrin doonta codsigaaga kadibna **kuu sheegi doonta go'aanka 10 maalmood gudahood** markaad codsigaaga keento kadib. Haddii la ogolaado, SDCI **ayaa ku siin doonta jeeg 14 maalmood gudahood ah, waxaana qasab ah inaad gurto taariikhda aad kusoo gudbisay codsigaaga.**

Sidee ayaan ku helayaa xog dheeraad ah oon ku codsan karaa?

Hel xog badan oo ku saabsan barnaamijka EDRA, oonleen ka codso, ama hel codsiga waraaqda ah adoo galaaya webseedkeena: www.seattle.gov/rentinginseattle/edra.

Wali ma qabtaa su'aalo ama ma u baahan tahay caawimaad ku aadan codsiga? Wac Laynka Tooska ah ee Renting in Seattle (Kirada Guryaha Seattle) ee SDCI ood ka wacayso 206-684-5700. Caawimaada luuqada ayaa la heli karaa

Wac 206-684-5700 ama www.seattle.gov/rentinginseattle/edra.